# BACKGROUND

The Institute for Peace and Security Studies (IPSS) of Addis Ababa University and the Peace Research Facility (PRF) of the Rift Valley Institute (RVI) jointly organized a seminar on the theme 'Rethinking Ethiopia: A Seminar on Youth Voices', held on 22 February 2024. The seminar was based on a call for submissions that these organizations made in September 2023, requesting essays commemorating the 50th anniversary of the 1974 Ethiopian revolution.

The Ethiopian revolution marks a significant turning point in Ethiopian history, bringing about major social and political changes with far-reaching consequences. In commemorating the 50th anniversary of this historic moment, it is important to reflect on this legacy and the lessons that can be drawn from it. Moreover, the ideas discussed and debated at that time remain central to public life in contemporary Ethiopia. The Institute for Peace and Security Studies (IPSS) of Addis Ababa University and the Peace Research Facility (PRF) of the Rift Valley Institute (RVI) provided a national platform for further articulation, exchange and debate about the future(s) of Ethiopia.

To this end, these organizations invited young Ethiopians (18 to 35 years old) to contribute their ideas, in the form of a 2000-word essay, on what they take to be the contemporary challenges in Ethiopia and to propose solutions from variety of disciplinary backgrounds. The essay competition was intended as an opportunity for young writers to assess the legacy of the Ethiopian student movement and revolution, identify the main causes of current predicament(s) facing the country and look ahead to the next 50 years. Through this initiative, the host institutes aimed to provide a national platform for young Ethiopians to discuss and debate the challenges and contradictions facing the country and to propose solutions to make Ethiopia a more peaceful and prosperous nation for all its citizens.

Those wishing to submit an essay were instructed to outline an analysis of their view of the Ethiopian problem(s) and proposed solution(s). Contributions were welcomed from all disciplines and backgrounds and were not expected to be heavily referenced. The call for ideas was advertised on 12 September 2023 (https://ipss-addis.org/call-for-submissions-rethinking-ethiopia-a-call-for-youth-voices/), which coincides with the date that *Atse* (King of Kings) Haile Selassie I was deposed from office. Given internet shutdowns affecting some parts of the country, particularly Amhara region, we sought to ensure equitable representation and participation from across the country. To this end, we assigned focal persons as the primary point of contact in Gondar, Bahir Dar, Dessie and Debre Birhan.

We received more than 40 submissions in four different languages: English, Amharic, Afaan Oromo and Somali. These submissions came from several areas, including Addis Ababa, Oromia, Amhara, Somali, Southwest region and Central region. A panel composed of 4 RVI and IPSS representatives reviewed the submissions based on agreed selection criteria that focused on originality, progressive value and clarity of thought of the proposed recommendations. Ensuring a diversity of voices (societal, sex) was also a key consideration.

The panel then selected 15 contributors, who received mentorship to further refine and shape their essays. The 15 selected semi-finalists received writing mentorship from esteemed Ethiopian scholars: Dr Serawit Debele, Dr Netsanet Gebremichael, Dr Kiya Gezahegn, Dr Mercy Fekadu, Dr Yonas Ashine and Shimellis Hailu. These mentors were selected for their expertise, diverse educational background and capacity, and willingness to work with and mentor the young contributors. After a month-long mentorship process, the mentees submitted their final essays.

The final version of these 15 submissions were reviewed by a four-member group from the RVI and the IPSS to select the 5 best essays for presentation to a wider audience at the seminar in February 2024 and for publication in a range of languages: Amharic, Afaan Oromo, Tigrigna, Somali and English. The same agreed criteria were used to select the essay finalists: originality, progressive value and clarity of thought. We also aimed for gender-balanced group of finalists, with two young women and three young men selected. Among the five finalists, two are undergraduate students in their final year, one is a MA candidate, one is a graduate degree holder, and one is a recent LL. B graduate. Three are based in Addis Ababa, one is from Debre Birhan in Amhara region, and one is from Hawassa in Sidama region.

The seminar on 22 February 2024 was organized with the intention of providing the selected essay finalists an opportunity to present their work to a wider audience. It also intended to solicit reflections on the last 50 years since the 1974 revolution from scholars familiar with relevant social, economic and political issues. The seminar report is published and can be accessed at organising institutions websites [https://ipss-addis.org/; https://riftvalley.net/]. This bulletin contains the Somali version of the essays. We are hopeful it would make the essays accessible to a wider audience. We would like to express our gratitude for the essayists and translators and everyone else who made this possible.

## **Betelhem Molla: Qaran iyo Aragti:** Aqoonyahankeena hadda iyo kuwi hore ee bari-samaadki

Qaran macnihiisu waa dad! Waxaan aaminsahay aragtida wadaniyadu in ay tahay wax qulubta dadka ku dhex abuuran. Marar badan waxaa aad arkaysa dadku iyaga oo fikirkooda ku cabiraya ruuxiya ama aragti bulsheed. Aragtida wadaniyadu waa mid si sax qulubta iyo maskaxda dadka ugu abuuran oo saldhigatay. Wadankeena itoobiya kumaanaan sanadood ayey jilaal kala gadisan iyo aragtiyo kala duwan kuso mid-eysay shacabkeeda taasi oo ay suurtagalisay isku haynta dalka iyo in uu jiilba jiilka kale is-dhaxalsiyan dal. Hadaba qoraalkani waxa u diiradda saaraya sooyaalki wixii ka dambeeyay 1960 T.I gaar ahaan su'aa-lihii kadhashay isrixrixi iyo ogaalki bulshada ee sababay kacdoonka shacabka kaas oo meesha ka saaray xukunki boqortoyada ee kumaanaanka sanaadood soo jiray. Haba ahaate nidaamki hanti-wadaagahaa ee la hirgaliy itoobiya waxa uu ka jawaabay su'aashii beeralayda lahaanshaha dhulka iyaga oo dhulkoodi dib u helay.

Hasayeeshe kacaanki wuxuu ku beeray dadki fikirka keenay walbahaar iyo cabsi oo aay ka qaban nidaam-kani in uu caruurtooda madaxa isku galiyo oo xaabo ka dhigto oo aay karin xabadu. Hanaqaadki kacaanku oo ku bilaamay kaso horejeesashada aragtiyada iyo fikirada xorta ah oo isku badalay nidaam dawli dhexe iyo awood ciidan. Hasaa ahata nidaamki laga filaayay inu tageera hanaqadka dhalinyarada naatijadi ka dhalatay waxaay noqotay cabudhin, jidh-diil, dhimaasho iyo barakiciinta dhallinyarada.

Wuxuu keenay in dhalinyaradi 17 sanaadood halgaanta kujirtay inaay qulubta dadka hantan oo islamarki aay xilki gacaanta ku dhigin u muuqday nidaamkogi dawligaha mid dimuuqoradiyadeed oo xor ah.

Xiliga wixii kadambeeyay waxaa sodabar-go'ay dhibtadi aay u gaysan jireen dhalinayarada itoobiyanka ah madax-cad iyo madax-casta. Waxaa so ifbaxay isbadal dibloomaysida iyo dhaqalaha oo aay mid ahayeen maartigalinta xaruunta midowga afrika ee caasmida Addis Ababa iyo dhagaxdhiga iyo bilaawgi mashruca wayn ee biyo-xidheenka wabiga nile.

Dhinaca kale waxaa so ifbaxay in dawladi dhexe aay hal qoomiyad gacaanta ugashay. Waxaa so muqatay inu jiro isku-dhelitir la'aanta horumaarka dhaqaale ee deeganda dalka oo kuwa qarna ku abuurtay dareen faqooqid ah iyo cabuudhiinta xoriyatul qawlka. Ciidkasto ka hadlo ee fikirka kadhibta ariimaha dawladaha laxidhiidha.

Halki laga sugayay iin laga jawaab cabaqashoyinka iyo su'aalaha shacabka oo isku badashay iin lawaayo jaan iyo cidhib ama la xidho oo la sil-ciyo ama la barakiyo Kadib 2011T.I waxaa ladhihi kara waa wakhitigi aay shacab-waynaha itoobiya dhammantood aay ku farxeen oo aay nawilayeen rajo wanaagsan oo aay islahayeen waa wakhtigi isbadal wanaagsan. Hase ahaatee, waraarka maalin laha waxaa aay iskubadaleen inaay sotaabiyan dil, dhac, dagaallo, abaaro, barakaciin iyo burbur iyo gubiid goobaha diimeed oo maa horseedin isbadalku xaqijiinta dheef lo siman yahay.

Maxaad isleedahay waxaas oo dhan ayu sabaab uyahay? Su'aashas marka u ruux kaste iswaydiyo wax mark-aba jawaabta kuso dhacaysa maskaxdisa waxaay noqonaysa inu isdhaho dalka itoobiya waxaa ku wada nool qoomiyado kala duwaan oo aaminsan diimo kala gaadisan oo aay adagtahay inaay wada nooladan ama iin hore oo colaaded ayaa kadhaxayso.

Waxaay ubadantahay inaay u arkan qayb-kamid ah dhibtooyinka naatijadi kadhalatay halgaanki horseeday nidaamka ismaamulka qowmiga (federaaliga). Waxaa jiro labbo araagtiyadood oo iska so horjeeda marka laga hadlayo nidaamka federaaliga ee ku dhisan qowmiga. Halka araagti kobaad ay tahay jiritaanka iyo wada-jirka wadanka inu asal u yahay nidaamka ku dhisan qoomiga. Balse araagtida kale waxaay leedahay asalka dhibootiyinka kadhex aloolsan dalka inu yahay nidaamka kudhisan qowmiga oo isla badbaddada dalka u bahanyahay nidaam kale oo federalism ah oo aan ahayn kudhisan qowmiga.

Balse shakhsiyan labaada araagtiyod midna ma raacsani, Marka kobaad dalka madaama aay kuwada noolyihin qowmiyada iyo shucub badan way adagtahay inaay midayso waxaan ahayn nidaamka federaaliga ee kudhisan qowmiga. Haddaba nidaamkan wuxuu u sahlaya qowmiyadaha iyo shucubta in aay ku fanaan shakhsiyadoda islamarkana horumaariyan luuqadooda, dhaqankooda iyo qiyaamkooda kaso horseedayo fursado wanaagsan oo haanti maguurto noqota. Hase ahaate, qowmiyad nabad waarto kuma heesho inaay ku midooban isir wada-dhalasho ama Deegan aay wadaagan. Taas beddelkeeda, waxaay sabaabta gadaal maanta dib-ubilaawno oo aan dheex dabalaano colaad hor leh. Waxaa jiro ariimo muhiim oo maraag maa doon ah oo nidaamka qowmiga ku dhisan ee federaaliga xal dagdag ah iyo wax kabadal uga bahaanyahay. Waxaan halkan kuso gudbinaya labbo qoodab oo oo waaqica kusaalaysan islamarkana xal u noqon kara dhiibtada hadda taagan.

1. Waxaa lagamarmaan ah iin nidaamka qowmiga kudhisan ee federaaligu lajaanqado oo tix-galiyo aqoonta iyo waqiica dalka yalo. Sidaa lawada ogsoon yahay awoow iyo ayeeyoyinkeeni kahor kacaanki wakhtiyo kala duwaan waxaa ay qateen fikiradaha iyo afkarta calaamka kale ayaay u adeegsaden dhisida dalka iyo maamulka shacabka. Balse awoowyashi hore araagtida iyo fikiro dalki aay ka so daynsadeen ayaay uga horumareen ka faa’iidaysigeeda ayaaga oo coobiyay islamarkana wax-kabadal kusameeyay fikirki. Qaybweliba oo bulshadu kamid ah waxaay u leeyihiin hibo gaar ah inaay nolol maalmeedka kamid noqoto oo aay jiil ba jiilka kale u gudiyan. Wakhti aan taganahay waxaan aaminsanahay nidaamka dimuqooradiyadda iyo federaaliga ku dhisan qowmiga ee aan istiicmalno waa laga marmaan inaan sii wanaagsan u faahano madbiyan iyo hadaf ahan islamarkana qaabka aan fahamnay inaan ugu gudbino bulshada oo aan ka taxadirno fahamka khaladka dhibta u keeni karo. Intaa waxaa dheer oo muhiim marka afakar iyo aragtiyo cusub laso ergaysanyo iin cilmi-badhis baladhan lagusameeyay taas oo lagu hubinayo inaay waxtar uleedahay taas oo kobcinayso dhaqanka iyo nidaamka bulshada oo aan ka hor-imaanayn qiyaamka, dhaqanka iyo maba’dida guud. Waxaa la inago fadhiya inaan kalinteena kaqadaano dhisida nidaam midaynano bulsho waynta itoobiya oo hal kadhigaya isku dubnideeda oo horseedo wadajir waaro. Sabaabtas ayaa keenaysa in lo baahdo dib ufirin lagu sameeyo wixii ka khaldamay hadafki nidaamka federaaliga qowmiga ku dhisan ee kacaanki ardayda ee 1960TI iyo hadda halka aan so gadhnay ayaa hal saaxiitan noqon karta. Waxaa la isku wafaaqsan yahay hadafka kacaanku inaay ahayd hirgalinta sinaan qowmiyadaha dhexdoda oo aay meel uga so wada jeestan xadgubuka hal qowmiyadi wado. Has ahaate, iyada oo aay tahay aragtidu sidaa qowmiyadaha dheexdoda waxaa ka abuurmay kala-shaki oo aay qowmiyadba midba mida kale u awood sheegato oo maa ahayn isdhahno sida ‘Soomaali ayaa kumaamuli oo cagta idiin hoos marin’ ama ‘canfaar ayaa kumaamuli oo cagta idiin hoos marin’ ama ‘qomiyada hamar ayaa idiin maamuli oo cagta idiin hoos marin’ iwm. Afakarta wakhitigas waxaad sii fudud uga dheehan karta qooraladi wakhtigas oo aay kamid yihiin Wallaley makoonan ee ‘Qowmiyadaha su’aashoda’ ayaa sii fiican uga boogan karta. Wadaniga wax-garadka ah waajib ayaay ku tahay inu isxoreeyo marka hore kadib u caawiyo ciida kale halgaankooda xoriyaada doonka ah. Marka la turjuumo nuxurka qooralka wuxuu tibaaxayaha inaay waajib ku tahay hal qowmiyad inaay is-xorayso oo aay so ridaato xuquuqdeeda iyo danaheega. Intaas kadibna inaay ku kalmeeyso kaliya maa ahina waajib ayaay ku tahay inaay qowmiyadaha xuquuqdo iyo danoohoga u halgaanto xaaqijintooda. Qowmiyad marka aay tageerto oo aay garab-gasho mida kale waxaa aan fahmayna inaay ka dhigantahay dhisida qaran xoog leh oo wadaajira. Sidaa darteed waa muhiim oo laga marmaan ah fahmiid sax ee aragtida nidaamka federaaliga qowmiga kudhisan oo aan wacayiga kor uqado.

2. Dawladda dhexe ee federaalka maa aha kaliya inaay damanad qaado sinaanta iyo daanta guud ee qowmiyadaha iyo shucubta itoobiya balse waajib ayaa kasaran hor tagaa inaay noqoto xaruun hal qowmiyad kumujiso saraynteeda ama aay ku argoosato. Dawladdu waa muhiim inaay ka shaqayso hirgalinta shurucu sii heer sare u ilaaliso xuquuda bini adaamtinimo ee guud iyo mida gaarka ah (Shakhsiga). Waa lobahaan yahaan xaruumo dawladeedu oo awood leh oo dhawri karto xuquuqda qowmiyada ee inaay ismaamulan, luqaadoda addeegsadan oo ay ku waxbartan iyo inaay kushaqeeystan. Sido kale, xuquuqaha shakhsiga ee sida inu ruux si xoor ah u socdaalo dalka

dhexdisa, ku noolado meelkaste oo wadanka kamid iyo hanti tabcaan karo. Hase ahaate, xaladaa wakhti xadiirkan dhibtada aay gaysanayan shakhsiyadka shadka qowmiga gashan daboolka ayaay kaqaday tamaar daraada dawladda iyo fashilka inaay ilaaliso xaquuqda muwadiniteeda. Marnaba inaay dhacdo maa aha in muwaadin itoobiyan ah oo kaso jeedo qowmiyada Amxaarada ama oromada inu deeganada u tago sii ugu noolado, ama ka-shaqysto oo haanti ku tabcado taas oo horseedo inu ku xadgubo xuquuqda qowmiyada kale ama khatar ku noqdo. Haddi laga firiyo dhanka Ilaalinta xuquuqda guud waajib ayaay ku noqonaysa barashada luquuqada deegaanka iyo ixtiraamka dhaqanka iyo qiyaamka bulshadas. Kasokow intaa haddii muwaadinka diil ama waxyeelo uso gadhayso isiirkisa ama qabiilkisa darteed waajib ayaa saran dawladda ilaalinta iyo dhawrsita xuquuqdisa. Haddaba, labada cirif meel dhexe in aay iskugu imaadan oo isla qataan araagti midaysan marka aay leeyihiin xuquuqda guud waxaay la simaan tahay mida gaar ahaneed (shakhsiga) ama sii kale marka lodhigo xuquuqda muwadiniintu waxaay la simaan tahay mid qowmiyadaha. Nidaamka federaaliga ee kudhisan qowmiga ee ansax noqonayn marka u khatar galinayo xaquuqda gaarka ah (shakhsiga) ayaan aaminsanahay iyadna inaay ansax ahayn nuuca federaaliga ee khatar galinayo xuquuqda qowmiyadaha. Isku-dhelitirka xuquuqda gaarka ah iyo mid guud ayaa ku imaan karta in lahelo xarumo dawladded oo leh xirfaleeyal aqoon iyo anshax leh oo sinaan iyo ixtiiraam kudheehan yaay waxqabadkooda. Balse, dhibatadu waa sii jira doonta inta nidaamka dawliga ee deeganadu gacaanta aay kuhayan koox is-reer ah oo aay dawladda dheexena kala mid tahay qaabdhismeedka. Ujeedkaygu xubnaha kamid noqonay dawladda dhexe ee kudhisan nidaamka federaliga qowmiga ee aay shakhsiyadku waakilo uyihiin qowmiyadaha aay kaso jeedan ee masuuliyada maamul ee kor-joogtayntoodana ruux qowmiyad ihi qaadayo, balse aay muhiim tahay ruux inu kisofobo dhex-dhexadnimo dhamman dadka oo idil u hadafkisu yahay dhisida qaran iyo dawladd awood leh oo kushaqayso qorshe iyo siyaasadada dawladda dhex oo leh isla-xisaabtan. Hadday arrintu sidaas ahayn, waxaan dhahayna sidii cadaada ahayd ee wakhtigi yahadhigta ee 'tigree ayaa korka inaaga tagaan oo xukumayay' iyo sidaa aan dhahno hadda xisbiga barwaaqo ''oromo ayaa korka inaagaga tagaan oo inaa xukumato'. Waxaa caado noqotay oo sii dhab ah la isku waydi su'aasha Yaad jeclaan lahayd inu xukunka qaabto? Haddi aay dadku rajo beel ku doorta ciida xukunka qabanyso oo aay dawladda dhexe qowmiyad majaraha xilka qabto kadhigto xaruumo logu tacdiyo qowmiyadaha kale shaki maleh wakhti kadib iin qaranku u kala bixii doono dawladda yar-yar oo bilaa tamar ah. Hase ahaate, intaa fahamkayga qowmiyadi inkasto aay kali-geed noole ahaato oo aay ku goodiso gooni-ugoostad cabsi galiin mooye majirto mid rabto inaay noqoto dawladd yar oo gooni- ugoosad. Haddi dawlad deegaanda aay yeeshan awooda ilaalinta xuquuqda guud sido kale waa in hela sharci masuuliyada ku qaadi karto xadgub qowmi ah haddi kadhex dhaco deegaanka. Mar haddi la aay dawladda dheexe joogan madax iyo xirfadlayal anshax leh oo bulshadu u simaan yihiin ukala cad yihiin saxda iyo khaladku oo aan ahayn kuwa aay indh- tireen jacaylka ama nacaybaha aay u qaban qowmiyad waa la xaqijiin kara nabad la nawaaliyay. Waxaay kadhigtanahay haddi wada-noolshena aragtiyada kala duwaan ee kadhasho maa horseedi doonan dagaal.

Haddaba muxuu noqon kara jiidka lagu xaqiijin karo arrintan? Su'aasha xigta waxaay noqon halke ayaan ka bilownaa? Waxaan jecelaystay inaad qoraalkan diraada kusaro doorka aqoonyahanka ku leeyahay qaybha kala gaadisan. Waxaan isleeyahay aqoonyahanka hadda jooga waxbadan ayaay ka baran karan aqoonti ee aqoonyahanki barisamaadki.

Marka aynu jaleecno halgankii aqoonyahanki 1960-kii, ee asaaska u ahaa Itoobiya dimuqraadi ah, waxaa yaab leh, in waxgaradkii ka dhiidhiyay dawladnimada iyo nidaamka, ay su'aalahoogu ka mid ahayeen, "Muliyada dhulka lagu wareejiyo beeralayda", "Kor- loqaado noloshii danyarta ku nool magaaloyinka, " sinnaanta qoomiyadaha" iwm, Su'aalahogi oo fagaare walba ka kacay oo sabaabay xarig iyo diil aqoonyahan badan balse taas waxba uma dhimiin nooloshodi.

Taa beddelkeeda, intooda badani waxay ka u leexden jiidki noloshoda oo waxaay hureen mustaqbalkooda xoraaynta iyo inaay nolool wanaagsan heelan dadkogu. Markaynu ka fikirno halgankii xiddigihii 1960-

kii ee jiidkste ku kufay, ayaaga awoodo in ku nolaadan nolol wanaagsan, maa iswaydisay inaan garnay mustaqaablki aay higsanayeen? Hadafku ay ku bilaaben ardaydi ugu horaysay halgaanka oo aha maxaan dalkayga u qabta iyo dadkayguse heer wanagsan ayaan mudanyihiin. Kacdoonki 1960T.I ardaydu ee banaanka uso baxaay ee kudhawaayay 'beeralyda dhulka hal siyo' waxaay mudananta siyeen beerlayda oo aay ka walwalayeen oo islayaheen way mudanyihiin nolol midan ka wanaagsan. Balse ardayda wakhtigan joogta badankood maa kulatahay inaay ka fikiri oo aay iska hormaarinayan daanta guud ee bulshada mise isaga ayaa dhihi aniga ayaa mudan waxkaste oo kor isku qaad qaadi. Maxaa kula tahay su'aashi ahayd ''dhulka beerlayda halagu wareejiyo' araagti lamid ah keeni kara sida 'beeralaydu biyo naadifa garaysiya' iyo beerlayda caafimaad gadhsiya' 'beeralaydu jiid ha heesho' iyo 'beeralydu laydh haa heesho' iwm ee nolool wanaagsan u horseedayo beerlayda.

Nidaamka federaaliga ee qowmiga kudhisan dhibato ma noqdeen haddi dadka hadda waxbartay aay fikir heer sare iyo araagtiyo wawayn ay higsan lahayeen sidee aya kor logu qaadi laga heerka nolosha magalaada iyo reer miyiga oo xal logu heli laha dhibatoyinka dhaqale iyo kuwa bulsho ee tagan.

Haddaba, si looga gudbo dhibaatooyinka dhinaca kaabayaasha dhaqaalaha iyo dib u dhaca kale ee dhinaca beeraha, ee beeralayda dalkeena ay xilligan wajahayaan ugu yaraan wax muhiim ah inaan damanaad qadno cunadeena oo waajib ayaay ku tahay aqoonyahankeenu ugu yaraan sameeyo nooca agabka beeraha ee ay adeegsadaan dadka casrigan jooga.

Ma aha oo kaliya dadka beeralayda ah laakiin sidoo kale bulshada magaalooyinka deggan ee u nugul cudurrada dhimirka iyo dhibaatooyinka kale oo ay ku adagtahay in ay kusi jiraan nolosha iyo miciishada qaaliga ah iyo shaqo la'aanta baahsan iyo culeysyada kale ee hadh iyo habeen udiday naafisan ayaa mudan wakhti iyo fikirka aqoonyahanka oo aay kaso saran war-murtiyeedyo.

Balse halki ay xal uga raadin lahaayeen mushkilada dalka ka jira qaab aay dareen lahaanshaho kudhehantahay, qaarkood waxay ku foogan yihiin oo kaliya danta qowmiyadooda oo halkii ay wax ku biirin lahaayeen fikradda wada-nolashaha dalka ayaay ku mashqulsanyihiin qaybka noqoshada fikirda nacaybaha beerayo. Kuwii aad islahayd wax wanaagsan ayaay bulshada uso wadaan ayaad arki ayaaga oo siyaaasiyin isku cunaayo ama la af-gambiyay. Halka qaybina aay afki-juuqda gabaay ku andacoonayan inu xalku aad xumaday. Inkalena waxaay ku foogan yihiin danaahoga oo waa iloowen dadki kale ee nolool wanaagsan samaaysany oo mashakilki dalka dhinac ayaay iska dhigeen. Waxaay iska indha-tireen iyo iska dhadhiciyeen inuba jiriin mashaalki dalka bulshadi wax bartay ayaay kala go'een sii aay xalka uga heli lahayeen dhankoga.

Aqoonyahanka waxaa loga bahaan yahay ahmiyad gaar ah inu siyo fikirada iyo xalka abuurayo wadajiirka iyo wad noloshaha bulshada oo kusalaysan sii misaaman ula-falgalayo mashakilka oo aan hurinayn dhibaatoyinka siyaasadeeda ee keenayo mashakilka faraha-baxo.

Waxaa loga bahaanyahay aqoonyahan hadda jooga inaay kalintooda sii buuxdo uga qayb-qataan aay dadaalkeedi galan sidii aqoonyahanki bari-samaadki aay kalintooda uga so baxeen.

Halkii ay si firfircoon uga qayb qaadan lahaayeen xal u helida caqabadaha ummadeena haysta iyaga oo dareen wada lahaansho ah, shakhsiyaadka qaar waxa ay si murugo leh uga hormariyeen danaha qowmiyadahooda. Halkii ay wax ku biirin lahaayeen aragtida shacab midaysan, waxay si aan ogayn u sii wadaan kala qaybsanaan iyo waxyeello. Dhanka kale, qaar kale waxay doorteen dariiqa dhayalsiga, iyaga oo kaliya ku foogan horumarka shakhsi ahaaneed, indhahana ka qarsada dhibka ummadda haysta, taasina ay ku fashilmeen inay garwaaqsadaan oo ay wax ka qabtaan arrimaha masiiriga ah ee u baahan in xal loo helo.

Si wax looga qabto dhibaatooyinka siyaasadeed ee ina haysta, indheer-garadku waa in ay keenaan xal ku salaysan aqoon, kobcinta wadajirka bulshada iyo sinnaanta. Inaga oo ku dayanaya culimadii hore, indheergaradka maanta waa in uu dadaal dheeri ah ku bixiyaa sidii ay si macno leh uga qayb qaadan lahaay-

een horumarinta wadajirkeena. Xataa haddii natiijo la taaban karo oo ka soo baxda khibraddooda ay si degdeg ah u yareyn karin culayska shacabka, waxay si mug leh u xoojin karaan horumarka ummaddeenna, iyagoo ka fogaanaya musuqmaasuqa iyo dedaallada sii kordhinaya dhibaatooyinka shacabka, oo ay ka mid tahay in si caddaalad ah looga faa'iidaysto khayraadka laga helo cashuuraha. Si taas loo gaaro, machadyada tacliinta sare waa in ay ku daraan adeegga bulshada oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah tababarka cilmi-baarista, siinta aqoonyahannada fursado si ay si qoto dheer ugu dhexgalaan caqabadaha bulshada una dejiyaan xalal macquul ah.

Asal ahaan, daawaynta khilaafkeenna bulsho waxay ku jirtaa is-daawaynta iyo is-xakamaynta dadka indheergaradka ah. Halkii ay eed u saari lahaayeen bulshada, aqoonyahanku waa in ay si qoto dheer uga baaraandegaan, "Maxay wax ku soo kordhin karaan bulshadayda, aniga oo ka fiirsanaya qaab-dhismeedkeeda iyo baahideeda gaarka ah?" Waa inay si hagar la'aan ah u gutaan waajibaadkooda xirfadeed ee u adeega nabadda iyo horumarka, iyagoo u arkaya qayb kasta oo bulshada ka mid ah inay tahay mas'uuliyad iyaga u gaar ah, una guntaday xalinta mushkiladaha dhexdooda. Aqoon lahaanshaha iyo go'aan adag, waa in ay ku dadaalaan sidii ay ummaddeenna iyo bulshadeenna uga xorayn lahaayeen ku tiirsanaanta dibadda, si loo kobciyo horumar waara oo ka facweyn.

Dedaalkan, waa in aan ka helnaa dhiirranaan, adkaysi iyo naxariistii madaxdii naga horreysay, anagoo ku dadaalnayna inaan u dhaxalno Itoobiya wanaagsan jiilasha soo socda. Marka aynu ku milmayno fikradaha hal-abuurka leh ee hiddaha wadaniga ah iyo ilaalinta qiyamka wada-noolaanshaha ee aasaaska u ah aqoonsiga ummaddeenna, waxa aynu samayn karnaa daraasado iyo tijaabooyin bulsheed oo xoojinaya mabaadi'da sooyaalka. Ku beeridda dareenka ixtiraamka iyo jacaylka dalkeena iyo dadka, gaar ahaan kuwa aqoonta leh, waa lama huraan socota - taas oo u baahan in si firfircoon loo beero dabeecadaha iyo dabeecadaha togan ee nafteena iyo bulshada oo dhan.

## **Lamesgnew Negalign:** Madaxweyne loo dhan yahay, Codbixin loo dhan yahay: Sida Dib-u-habaynta Maamulka iyo Nidaamyada Doorashooyinku u daweyn karaan Dhaawacyada Qoomiyadaha Itoobiya

Jiilalka soo socda, waayo-aragnimada qoyskaygu waxay uga tarjumaysaa saamaynta qotoda dheer ee qowmiyadaha Itoobiya. Waxay ku bilaabantay go'aankii awoowgey ee ahaa in magacyo Amxaari ah la qaato, taas oo ay sii wateen jiilkii danbe. Markii aan soo koray, waalidkay waxa ay mareen nidaamka boqortoyada halkaas oo Amxaar kaliya si rasmi ah loo aqoonsaday, taas oo muujinaysa awoodda hal qowmiyad. Hooyaday oo ka soo jeeda qowmiyada Oromoda ayaa baratey ku hadalka luqadda Tigriiga muddadii ay dalka Eritrea ku sugnayd, waxay noqotay hanti istiraatijiyadeed oo hoos timaada xukunka TPLF, taasoo u sahashay inay hesho adeegyo wanaagsan oo ay ka hesho xafiisyada dawladda. Maanta, waxaan si toos ah u arkaa faa'iidooyinka ay saaxiibaday qaarkood ku raaxaystaan sababtoo ah sida faseexa ah ay ugu hadlaan luuqada oromiffaga , halka qaar kalena ay caqabado kala kulmaan goobaha dawladda sababtoo ah garasho la'aantooda luqadda. Xaqiiqda qawmiyadeed ee Itoobiya kaliya maaha fikrad aragti ee waxay u qaabaysaa nolol maalmeedkeena siyaabo la taaban karo.

Xataa wakhti xaadirkan ah, qabsashada qoomiyadnimadu waxay sii wadaa inay midabayso aragtidayda ku aaddan sinaanta raadinta Itoobiya. Waxa uu ahaa safar adag, oo lagu asteeyay halgan weligeed ah oo u dhexeeya isku-duubnida iyo ka-reebista joogtada ah, dhammaan waxaa sii huriyay saamaynta xun ee dhaqdhaqaaqa awoodda qowmiyadeed. Dib u milicsiga waqtiyada muhiimka ah ee jidkan ku jira waxay muujinayaan casharrada miyir-qabka ah iyo rajo-beelka mustaqbalka.

Halganka Itoobiya ee ka dhanka ah burburinta qawmiyadaha ayaa soo noqnoqday taariikhda oo dhan, laakiin qaybo yar ayaa ka muuqda in ka badan dhaqdhaqaaqii ardaydii 1960-kii. waxay noqdeen kuwo u ololeeya oohinta aamusan ee dadka la haybsooco, iyaga oo u gudbinaya aragtida sinnaanta hantiwadaagga baaq qaylo-dhaan ah oo loogu talagalay bulsho aan dhalasho ahaan lagu ooday aqoonsi ( Kasim , 1985). Dalabkooda dib-u-habaynta dhulka iyo hab-siyaasadeed loo dhan yahay waxay ahaayeen isbeddello dhul-beereed, oo gacan ka geystay kacaankii 1974-kii ee afgembi boqortooyo oo dib u qaabeeyey qaranka ( Kasim , 1985). Dhaxalkooda kuma dhisna mudnaan gaar ah, balse waa halganka mustaqbalka ee lahaanshaha ay go'aaminayaan dadnimadayada, halkii ay ka ahaan lahaayeen sumadaha qowmiyadeed ee lagu shaabadeeyey warqadaha dhalashada.

Kacaankii Itoobiya ee 1974-kii, waa wakhti biyo-mareen ah oo meesha ka saaray nidaamkii feudal-ka/boqortooyada, waxa uu u guntaday in uu wax ka qabto sababaha keenay sinnaan la'aanta, gaar ahaan lahaanshaha dhulka. Dib-u-qaybinta dhulka beeralayda ma ahayn oo keliya isbeddel sharci; waxay ahayd tallaabo geesinimo leh oo loo qaaday dhinaca awood-siinta, iyadoo la siinayo kuwii ciidda ka shaqeeyay lahaansha-ha saxda ah ee ay mudnaayeen. Si kastaba ha ahaatee, kacaankii kadib wuxuu daaha ka qaaday dhibka ay leedahay in la gaaro sinnaan waarta. Waxaa cirka isku sii shareeray xurguf qowmiyadeed, mabda'eed iyo mid bulsho, taasoo hoosta ka xariiqday in burburka hal maamul aysan si toos ah u gogol xaareynin in la dhiso maamul cadaalad ah ( Kaasim , 1985).

Dastuurkii 1987, kaas oo aqoonsadey kala duwanaanshaha jinsiyadaha, luqadaha/afafka, iyo diimaha, waxa uu u taagnaa horumar la taaban karo oo loo qaaday ka mid noqoshada. Sinaanta, oo ah fikrad qotodheer, ayaa lagu qeexay dastuurka, taasoo calaamad u ah ka tagista nidaamyadii hore ee kala-saarayay (Dastuurka PDRE, 1987). Si kastaba ha ahaatee, eedeymaha loo jeedinayo Axmaarada ayaa weli sii socda, kooxaha hubeysana waxay ka faa'iideysteen fikradda ah " xukunka Amxaarada " iyagoo ka dhiganaya meel isu soo bax ah, taasoo ka dhigtay xaqiijinta fikradahaas mid aan la aqbali karin (Balcha, 2007).

Isbeddelkii taliskii 1991 waxa uu ujeeddadiisu ahayd in uu wax ka qabto arrimahan iyada oo la siinayo xuquuqaha ismaamulka bulshooyinka qowmiyadeed (Balcha, 2007). Si kastaba ha ahaatee, kala guurkan, oo talada Amxaarada ku beddelay hoggaanka Tigreega , ayaa si dhab ah u milicsaday mushkiladda salka ku haysa: xukunka dhexe ee qaran ka kooban qowmiyado kala duwan. In kasta oo qaab-dhismeedka federaalku uu damacsan yahay inuu awood u yeesho degaanada iyo qowmiyadaha, haddana ugu dambeyntii wuu ka gaabiyay inuu fuliyo ballamihiisii ( Tefera , 2019; Tola iyo Royo , 2022).

Taariikhda dhow ee Itoobiya waxaa ka socday colaado ba'an oo ay hurinayeen sheekooyin ku saabsan takoorid qowmiyadeed iyo loolan loogu jiro sharciyad siyaasadeed. Kacdoonkii Oromada ee 2015, oo uu ka dhashay soo jeedinta "mastar bilaanki addis ababa," ayaa u adeegay muujin xooggan oo mudaaharaad ah oo looga soo horjeedo khataraha la dareemayo ee ku wajahan aqoonsiga iyo dhaqanka Oromada ee hoos yimaada Tigreega xoogga badan. ( Asafa , 2017).

Dhaqan ahaan, iska caabinta Oromada ee qawmiyadaha waxay wadeen hadafyo kala duwan, laga bilaabo u doodista dariiqo gaar ah oo ka dhex jira federaal dabacsan ilaa madax-bannaani toos ah. Si kastaba ha ahaatee, muddada u dhaxaysa 2015 iyo 2018 ayaa si kala duwan u soo baxay. Waxay ugu horrayn ku wareegtey in dib loo raadiyo qab-dhismeedka nidaamka jira, halkii la raadin lahaa isbeddel xag-jir ah ( Jawar , 2023). Isbadalkan istaraatiijiyadeed wuxuu miro dhaley 2018 markii hogaamiye Oromo ah uu u soo baxay masraxa siyaasadda, isaga oo buuxinaya baahida muhiimka ah ee ka mid noqoshada nidaamka.

Si kastaba ha ahaatee, muddada isbeddelku waxay ahayd mid gaaban. Halka dib u habaynta la doonayey in lagu kala furfuro qowmiyadda Tigreega, qaar badan oo ka mid ah, gaar ahaan kuwa ka tirsan siyaasadda Amxaarada , ayaa ku doodaya in ay kaliya ku bedeshay qaab xukun oo kale, iyada oo hoggaanka Oromada uu hadda kor u kacayo (Tezera , 2021). Aragtidaasi waxa ay sii hurisay colaad kale, oo weli dalka aafaysay.

Fikradda qowmiyadaha waxaa loo aqoonsan karaa inay tahay arrin wax ku biirinaysa iskahorimaadka Tigray ee 2020-2022 , taas oo, marka loo eego xogta Herre et al. (2023), waa kii ugu dhimashada badnaa

aduunka tan iyo 1994kii xasuuqii Ruwaanda. Halka hogaanka Tigreegu u qaabeeyay isku dhaca sidii difaaca federaalka, waxa uu sidoo kale xambaarsanaa walaac ku saabsan saamaynta Amxaarada oo soo noqon karto.

Dhacdadii ugu dambaysay ee wareegtada qalalaasaha qawmiyadaha ayaa soo shaacbaxday sanadki 2023, iyada oo cabsida ay Amxaaradu ka qabto dawladda ay Oromadu maamusho ay ka muuqato isku dhac kale oo hubaysan. Markan, waxa diiradda la saarayaa sidii loo babac dhigi lahaa aasaaska siyaasadda hadda jira: dastuurka iyo nidaamka federaalka qawmiyadaha, oo labaduba loo arko inay yihiin kuwa dhibka ku haya shacabka Axmaarada.

Baadhitaan dhow ayaa daaha ka qaadaysa saddex xeeladood oo kala duwan oo sharci ah oo lagu adeegsaday iskahorimaadyadan is-xigay: Marka hore, dib-u-habaynta maamulka iyadoo la difaacayo federaalka; Marka labaad, u doodista in la helo xiriir dabacsan oo ay yeelato dowlad dhexe oo la dhimay si wax looga qabto cilladaha la dareemayo ee nidaamka federaalka ee hadda jira; iyo marka saddexaad, horumarinta maamul dhexe oo xooggan iyo burburinta federaalka ku salaysan qowmiyadaha. Dhammaan xeeladahaas waxay ku qotomeen in wax laga beddelo ama lagu ilaaliyo haykalka dawladeed ee xal u ah sinnaan la'aanta Itoobiya.

Si kastaba ha ahaatee, hagaajintani waxay khatar gelinaysaa in la iska indho tiro awoodda sharaxaadda kooban ee qaab-dhismeedka dawladeed oo keliya marka la go'aaminayo natiijooyinka bulshada. Falanqaynta taariikhiga ahi waxay muujinaysaa in dawladii hore iyo midda hadda jirtaba midna aanay si wax ku ool ah uga hortagin u jeedooyinka isir-ku-takoorka ah .

Tani waxa ay ina tusinaysaa in aynu ku dheggannahay qaab meerto ah oo ah nidaamyada qawmiyadaha, halkaas oo isbeddellada dawladnimada iyo qaab-dhismeedka dawladeed ay fududeeyaan uun beddelka koox awood leh oo koox kale lagu beddelo. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in la sahamiyo xeelado kale oo ka gudbaya doodda ku saabsan qaab-dhismeedka dawlad-goboleedka.

### Dib-u-Male-awaynta Maamulka: Jebinta Wareega Qowmiyadaha iyadoo loo marayo Dib-u-habaynta Nidaamka"

Iyada oo laga jawaabayo rabitaanka degdegga ah ee Itoobiyaanka ee sinnaanta iyo matalaadda dhabta ah, qoroomadani waxay u ololaynaysaa istaraatiijiyad laba-jibbaaran: u gudubka go'aansan ee loo maro hab-madaxweynenimo iyo hirgelinta nidaamka doorasho ee isku dhafan. Waxay carrabka ku adkeynaysaa muhiimada ugu weyn ee ay leedahay ilaalinta go'aan adag oo dimoqraadiyad ah inta lagu jiro hawshan.

#### "Midnimada iyo Horumarka oo leh Hannaanka Premier-madaxweyne ee Itoobiya"

Soo jeedintani waxay u ololaynaysaa in la qaato hab-madaxweynenimo-hoosaad- oo leh nooca Premier-Presidentialism, halkaas oo madaxweynaha si gaar ah looga soo doorto baarlamaanka oo doorasho toos ah la qabto, halka baarlamaanka oo keliya uu awood u leeyahay inuu kala diro Golaha Wasiirrada ( Sedelius iyo Linde). , 2018 ). Qoromadani waxay soo jeedinaysaa in la dhiso laan fulineed oo laba madax oo ka kooban: madaxweyne si toos ah loo soo doortay, kaas oo ay tahay inuu helo aqlabiyad buuxda ( 50% +), ra'iisul wasaare, iyo gole wasiiro oo la xisaabtamaya baarlamaanka. Intaa waxaa dheer, si loo hubiyo in madaxweynaha la doortay uu taageero ka helo degaan kasta iyo si loo dhiirigaliyo isku-dhafka, waxaa la soo jeediyay in madaxweynuhu uu ka helo ugu yaraan 20% taageerada degaan kasta oo dalka ah.

Nidaamka noocan oo kale ah wuxuu la jaan qaadayaa tixgelin dhowr ah:

**Sii wadista iyo Aqoonta:** Qaabka badh-madaxweynenimadu waxa uu bixiyaa kala-guur fudud marka la barbar dhigo nidaamka kaliya ee baarlamaanka. Itoobiya waxa ay hore u soo martay qaab dhismeed kaas la mid ah intii u dhaxaysay 1987 ilaa 1995, inkasta oo uu lahaa madaxweyne la doortay (PDRE Constitution, 1987; Transitional Charter, 1991). Ka qaadashada aqoontan waxay fududeyn kartaa hirgelinta waxayna kor u qaadi kartaa aqbalaadda dadweynaha ee nidaamka la soo jeediyay.

- **Xoojinta Sharcinimada iyo isla xisaabtanka**: Madaxweynaha sida tooska ah loo soo doortay waxa uu wanaajiyaa sharcinimada iyo isla xisaabtanka marka loo eego ra'iisul wasaaraha ay doorteen hal degmo doorasho ama xisbi taladda haya. La xisaabtanka tooska ah ee dhammaan codbixiyaasha, halkii xisbi keliya laga heli lahaa, waxay xoojin kartaa midnimada qaranka, waxayna yareyn kartaa aragtida hoggaanka la soo rogay ( Geachew , 2017).
- **Kor u qaadida nidaamka Isku-dhafka:** Doorashooyinka tooska ah ee madaxweynaha waxay dhiirigeliyaan siyaasad loo dhan yahay. Si loo xaqiijiyo dib-u-doorashada, musharrixiintu waa inay helaan taageero ka baxsan qowmiyaddooda, iyagoo dhiirigelinaya aragtiyo ballaadhan oo ay yareeyaan u jeedooyinka qawmiyad-qaran. Tani waxay la jaan qaadaysaa dadaallada lagu doonayo in lagaga xoroobo meertada qawmiyadaha ee ragaadisay siyaasadda Itoobiya ( Walle , 2017).
- **Dheelitirka Awoodda Fulinta:** Iyadoo madaxweynaha sida tooska ah loo doortay uu leeyahay awood weyn, ra'iisul wasaaraha sida dadban loo doortay wuxuu u adeegaa sidii xiriir muhiim ah oo ka dhexeeya sharci-dejinta iyo fulinta. Awood-qeybsigan ayaa ka hortagaya xukunka kaliya ee madaxweynaha waxayna xaqiijisaa kala qaybinta awoodaha ( Geachew , 2017; Walle , 2017).
- **Ilaalinta ka dhanka ah nidaamka qowmiyada**: Si looga hortago u janjeerida dhanka qoomiyadda, waxaa lagu talinayaa in lagu soo rogo xaddidaad labada jagooyinka fulinta ee ay hayaan shaqsiyaad ka soo jeeda isla beesha. Cabbiraaddani waxa ay buuxinaysaa isku-darka ka dhex jira ee ay kobcisay taageerada ballaadhan ee madaxweynaha ee doorashada.

### Kala-duwanaanta Guuleysata: Nidaam Doorasho oo Isku Dhaf ah si loo helo Itoobiya loo dhan yahay

- In kasta oo loo arki karo in qowmiyadaha iyo degaanada ay si cadaalad ah uga dhex muuqdaan hay'adaha sharci-dejinta federaalka Itoobiya, nidaamka doorashada hadda ee loo yaqaano FPTP waxa uu muujinayaa cillado waaweyn. Dhaliilahaas ayaa caqabad ku ah soo bixista codbixiyayaasha waxayna xoojinayaan awoodda hal xisbi iyo u janjeersiga qowmiyadaha.
- Ugu horrayn, guusha qaadashada dhammaan dabeecadda FPTP waxay niyad-jabinaysaa ka-qaybgalka cod-bixiyayaasha iyadoo cod-bixinta mucaaridku ee degmooyinka aanay u badnayn inay soo saaraan aqlabiyadda musharrixiintooda laga yaabo inay dareemaan guul-darro. Tusaale ahaan, doorashadii Itoobiya ee 2015 T.I, inkastoo 16% codbixiyeyaashii Addis Ababa ay taageereen xisbiga Semayawi , isbahaysiga talada haya ayaa ku guuleystay dhammaan 23 kursi ee baarlamaanka ee loo qoondeeyay magaalada, taasoo keentay dareen diidmo ah oo ka dhex jira codadka laga tirada badan yahay ( Adem , 2015).
- Marka labaad, FPTP waxa ay xoojisay awoodda xisbi keliya iyada oo awoodda ku ururisay xisbiga talada haya, taas oo u oggolaanaysa qowmiyadda ugu badan ee xisbiga talada haysa in ay saamayn weyn ku yeelato go'aan qaadashada xitaa ka hor inta aan la bilaabin doodaha sharci-dejinta. Tani waxay wiiqaysaa matalaadda waxayna sii wadi doontaa rabitaannada qowmiyadeed ( Eyob , n.d ).
- Is-afgaradkii 2017-kii ay gaareen isbaheysiga talada haya iyo xisbiyada siyaasadda ee mucaaradka ah si ay u qaataan nidaamka doorasho ee isku dhafan ayaa aqoonsaday cilladahan. Inkasta oo wada-xaajoodku markii hore diiradda lagu saaray saamiga FPTP iyo kuraasta saami-qaybsiga (PR), oo u dhexeeya 50: 50 (doorbixinta mucaaradka) ilaa 90: 10 (doorbida dawladda), ugu dambeyntii waxaa lagu gaaray heshiis 80:20 isku dhafan. Si kastaba ha ahaatee, dib-u-habayntan ayaa weli ah mid aan la fulin sababtoo ah isbeddelada nidaamka ee xiga ( Neamin , 2017).

Inkastoo dib u dhac uu jiro, haddana doodo adag ayaa taageeraya qaadashada nidaamka doorasho ee isku dhafan, gaar ahaan saamiga 50:50 ee FPTP iyo PR. Qaabka noocan oo kale ah wuxuu soo bandhigayaa faa'iidooyin dhowr ah:

- **Xoojinta Nidaamka isku-dhafka:** Nidaam doorasho oo isku dhaf ah ayaa hubinaya matalaad la taaban karo ee kooxaha aqlabiyadda iyo kuwa laga tirada badan yahay labadaba, taasoo u oggolaanaysa xisbiyada yaryar inay horumaraan oo ay la tartamaan kuwa waaweyn (Gremeskel). Waxa kale oo ay siinaysaa matalaad cadaalad ah beelaha yar yar ama kala firdhisan, iyada oo si tartiib tartiib ah u jebinaysa meertada hal xisbi iyo qawmiyad.

- **Kordhinta ka qaybgalka codbixiyayaasha:** Cod kastaa wuxuu muhiim u yahay nidaamka doorasho ee isku dhafan, taas oo ku dhiirigelinaysa muwaadiniinta inay ka qaybqaataan oo ay kobciyaan doorashooyin badan oo tartan ah. Tani waxay xoojinaysaa sharcinimada dimuqraadiga ah waxayna awood siinaysaa xisbiyada siyaasadda.
- **Codadka khasaaray ee la dhimay:** Qaybaha saami qaybsiga ee nidaamku waxay xaqiijinayaan in codadka loo dhiibo musharixiinta aan guulaysan inay wali gacan ka geystaan matalaadda xisbiyada, yaraynta xuquuq-la'aanta iyo dhiirigelinta ka qaybgalka ballaaran ( Gremeskel , nd ).

Isku soo wada duuboo, nidaamka hadda jira ee FPTP waxa uu si cad u hor istaagayaa ka qaybgalka dimoqraadiyadda waxana uu xoojiyaa dhaq-dhaqaaqa awooda dhibaatada leh ee Itoobiya. U gudubka 50:50 nidaamka isku dhafka ah ee doorashada waxa ay soo bandhigaysaa dariiq rajo leh oo loo maro isu soo dhawaanshaha la xoojiyey, kordhinta ka qayb qaadashada codbixiyayaasha, iyo ka bixida meertada xukunka hal xisbi iyo isirnimo.

### Gabagabo: Tirtirida Dabinka Qoomiyadaha iyadoo loo marayo Ficil iyo ka-go'anaasho

Iyadoo laga yaabo in hindisaha hab-madaxweynenimo iyo hab doorasho oo isku dhafan aanay ku cusbayn ka hadalka siyaasadda Itoobiya, haddana waxa ay bixinaysaa istiraatijiyad wax ku ool ah oo lagaga baxsanayo dabinka qawmiyadaha. Sida laga wada hadlay, in la helo madaxweyne iyo ra'iisul wasaare ka soo jeeda qowmiyado kala duwan, iyo xisbiyo kala duwan, waxay kor u qaadi kartaa awood qaybsiga waxayna yareyn kartaa dareenka qowmiyadaha marka ay dimuqraadiyadu qaan-gaarto.

Si kastaba ha ahaatee, qaybta muhiimka ah ee maqan maaha dood dheeraad ah, laakiin waa go'aan adag oo lagu hirgelinayo dib-u-habayntan. Isbadalka dhabta ah waxaa lagu gaari karaa oo kaliya in la kala hormariyo ajandayaasha sharci dejinta iyo fulinta. Sidaa darteed, waxaan ku boorrinayaa dhammaan daneeyayaasha inay si firfircoon ugu ololeeyaan dib-u-habayntan:

- Madaxweyne si toos ah loo doortay si uu ummadda u mideeyo oo hammi la wadaago.
- Nidaam doorasho oo isku dhafan oo hubinaya in codadka laga tirada badan yahay la maqlo lana metelo.

Iyada oo ay weheliso ballan-qaad dhab ah oo ku aaddan doorashooyin xor iyo xalaal ah oo dimoqraadi ah, dib-u-habayntani waxa ay ka dhabayn kartaa ballan-qaadkoodii: jabinta gacan-ku-haynta qawmiyadaha iyo in ay waddada u xaarto mustaqbal loo dhan yahay oo loo siman yahay oo Itoobiya yeelato.

## **Lidya Yohannes:** Dib-u-sheegashada Xuquuqda: Jinsiyadda marka ay wajahayso waxshinimada Booliska Itoobiya

Jinsiyadda, oo dhaafsiisan mawduuca kaliya , waxay ka kooban tahay xuquuqaha qaarkood ee lagu aaminay dawladda ee ilaalinta iyo xoojinta. Si kastaba ha ahaatee, dalka Itoobiya, fikradda muwaadinimo ama jinsiyadeed ayaa weli ah mid curdin ah, gaar ahaan aasaaski jamhuuriyadii ugu horreysay islamarkaana ka dambaysay dhaqdhaqaaqyadii siyaasadeed ee burburiyay xukunkii boqortooyo ee qarniyo jiray ee 1974-tii tirsiga itoobiya.

Qormadani waxa ay dood muhiim ah ka geysanaysaa in qodobka koowaad ee ka qayb qaadanaya dhibaatadan jinsiyada ay tahay arxan darada booliska ee baahsan iyo cadaalad darada nidaamka garsoorka, taas oo aan kaliya wiiqin sharcinimada ama jiritaanka dawlada balse sidoo kale sii hurinaysa dhibaatada. Qormadayduu waxay diiradda saari doonta saddex arrimood oo waaweyn oo kala ah: ku xadgudubka xuquuqda hantida, ku xad-gudubka xuquuqda nolosha iyo jirdilka, iyo cadaalad-darrada iyo dacwadaha garsoorka.

Islamarkaana Isagoo ka duulaya waaya-aragnimada taariikhiga ah iyo tan caalamiga ah, qoraalku wuxuu xooga saarayaa baahida degdegga ah ee loo qabo in wax laga qabto arrinta siyaasadeed ee jinsiyada ah.

Dunida maanta, fikradda soo jireenka ah ee mawduuca kaas oo ah jinsiyadda uu yahay maaddo kaliya oo hoos timaada awoodda dawladeed, laakin ayaa inta badan meesha ka baxday, islamarkaana xiriirka aasaasiga ah ee ka dhexeeya bulshada iyo dawladda ayaa ah mid aan jirin. Taa beddelkeeda, waqtiyo muhiim u ah taariikhda, oo ay ku jiraan kacaannadii waaweynaa, ayaa inta badan ku soo wareegtay su'aalo la iska weydiinayo ay tahay inta ay le'eg tahay awoodda dowladdu. Sidaa awgeed, sharcinimada siyaasadeed waxay hadda ku xidhan tahay taageerada dadka ee ku wajahan maamul dawladeed. Taageeradani waxay si qoto-dheer ugu xidhan tahay awoodda ay dawladdu u leedahay inay si hufan u gudato waajibaadkeeda.

Waxa udub dhexaad u ah waajibaadyadan ilaalinta muwaadiniinta iyo ilaalinta xuquuqdooda aasaasiga ah, sida xaqa nolosha, xornimada jidh-dilka, xuquuqda hantida, iyo helitaanka cadaalad. Xuquuqahani waxay aasaas u yihiin xidhiidhka ka dhexeeya dawladda iyo bulshada, waxayna u adeegaan halbeegyo lagu qiimeeyo waxqabadka dawladda. Marka ay dawladuhu ku guul daraysteen in ay dhawraan xuquuqahaas, waxa soo ifbaxaya qalalaase muwaadinimo ah, taas oo aan khatar ku ahayn muwaadiniinta oo kaliya balse waxa ay wiiqaysaa sharcinimada/jiritaanka dawladda lafteeda, taas oo la arkayay intii taariikhda jirtay iyo xaalado kala duwan oo caalami ah.

Dawladuhu waa in aanay waligood dhayalsan muhiimadda ay leedahay muwaadinimadu ama jinsiyadu. Casharro qiimo leh oo arrintan la xidhiidha waxaa laga soo minguurin karaa kiisas badan islamarkaana in laga barto ay tahay dhacdooyinki caalamka ruxay; sida falki loo geystey Rodney King iyo George Floyd ee Maraykanka, dilkii Nahel Merzouk ee gacanta booliska Faransiiska ay ku dileen, dilki Jean Charles de Menezes ee UK, kaas oo si naxdin leh loogu dilay tuhun argagixisanimo , iyo shan iyo tobankii qof ee ay booliska Kenya ku dileen intii lagu guda jiray masiibada Covid-19, iyo kuwo kale oo badan. Tusaalooyinkani waxay si cad u muujinayaan cawaaqib xumada ka dhalan karta waayida taageerada iyo raallinimada muwaadinka.

Xidhiidhka xun ee u dhexeeya dawladda iyo muwaadiniinteeda ayaa hoos u dhigaya heerka taageerada dawladdu hesho. Waxaa cad in dowlad aan dheg jalaq loo siinin, oo ku guul dareysata in ay wax ka qabato baahida dadkeeda, ay u badan tahay in ay hoos u dhacdo taageerada iyo soo dhaweynta. Halkii ay ku bixin lahaayeen lacago xad dhaaf ah ololayaasha xayaysiisyada quruxda badan ee kor u qaadaya muhiimada u hogaansanaanta cashuuraha, dawladuhu waxay si weyn u wanaajin karaan muuqaalkooda iyagoo si firfircoon ula macaamilaya muwaadiniinta. Cilmi-baaristu waxay hoosta ka xariiqaysaa doorka muhiimka ah ee kalsoonida dadweynuhu ku leeyihiin hay'adaha caddaaladda si loo dhimo dembiyada iyo kobcinta bulsho ammaan ah.

Waxaa intaa dheer, dunida maanta oo aadka iskugu xidhan, dawladi waxay taagan tahay masraxa caalamiga ah, waxay xidhiidh dhow la leedahay sharcinimadeeda gudaha. Dawlad ku caan baxday in ay xaqirto xuquuqul insaanka wax ixtiraam ah kama hesho dawladaha kale, taas oo saamayn weyn ku yeelaneysa maqaamkeeda caalamiga ah. Sidaa darteed, tilmaamayaasha sumcadda dawladi ku dhex leedahay dadkeeda ayaa sidoo kale u adeegi kara cabbirka sumcadda ay ku leedahay caalamka.

Xaaladda Itoobiya ayaa tusaale muuqata u ah danayn la'aanta muwaadiniinteeda. Intii uu socday dhaqdhaqaaqii ardayda, xadhiga iyo dilalka loo gaystay dadka muhiimka ah ee uu ka mid yahay Tilahun Gizaw, waxa ka dhashay caro baaxad leh isaga oo huriyey dardargelinta dhaqdhaqaaqa iyo kasbashada taageerada ballaadhan ee dadweynaha. Inkasta oo ay dhalatay jamhuuriyadii ugu horeysay ee Itoobiya ka dib halgankan dhiiga badan ku daatay, hadana waxaa meesha ka maqan dhaqankii dawladnimo ee shacabka sida dhabta ah loogu adeegayey. Caqabado badan ayaa jira laga soo bilaabo waagaas ilaa maanta, haddana ma jirto heerkii qaylo dhaanta dadweynaha.

Waa wax laga xumaado in, inkasta oo ay muuqato in ay dadweynuhu raalli ka yihiin, haddana dawladdu way ku guul-darraysatay in ay qaaddo tallaabooyin firfircoon oo lagu dhawrayo xuquuqaha aasaasiga ah.

Halkii laga faa'iidaysan lahaa fursadda lagu muujin lahaa hoggaaminta iyo kobcinta dhaqanka ixtiraamka xuquuqda aasaasiga ah, dawladdu waxay u muuqataa mid ka cago jiidaysa inay mudnaanta siiso daryeelka muwaadiniinteeda. Fashilkan wax ka qabasho la'aanta caqabadaha joogtada ah waxay sii wadaysaa niyad-jabka dadweynaha.

Markii maamulka hadda talada haya uu soo shaac bixiyey xad-gudubyo ka dhan ah xuquuqul insaanka ee horey loo geystey, sida kuwii ka dhacayay xabsiga Maekelawi la dhaho , oo ay weheliso ballan qaadyo dib u habeyn ah oo lagu sameeyay waaxda cadaaladda, ayaa waxaa jirtay rajo ballaaran oo laga qabo horumarinta dhaqamada fulinta sharciga. Nasiib daro wax horumar ah oo la taaban karo lagama gaarin arrintan; dhab ahaantii, xaaladuhu waxay u muuqdaan inay sii xumaanayaan islamarkaana ay ka sii darayaan. Tusaale ahaan, isbarbardhigga tusmada xorriyadda saxaafadda ee Itoobiya sannadihi 2020, 2022, iyo 2023 waxay daaha ka qaadaysaa isbeddel ku saabsan hoos u dhaca qiimaynta, oo hoos uga dhacay 99-aad ilaa 114-aad oo hoos uga dhacay 130-aad marka loo eego 180-ka waddan. Sidoo kale waxa naxdin leh ayaa ah tirada sii kordheysa ee difaacayaasha xuquuqul insaanka ee la sheegay in la afduubay, iyaga oo 27 ka ahaa 2020 ilaa 30 2021, ka dibna gaaray 37 sanadka 2022, oo gaaray 48 qof sanadka 2023.

Horumarka khuseeya arrimahan wax ka qabashada ayaa ah isku dayga lagu muujinayo inay yihiin dhibaatooyin qawmiyad gaar ah, dabeecad niyad jab iyo khalad labadaba leh. Shakhsiyaadka waa la bartilmaansadaa, la afduubaa, waana la jirdilaa iyada oo aan loo eegin qowmiyadda ay ka soo jeedaan, oo kaliya in ay muujiyaan diidmo. Si aan shaki kasta meesha uga saarno, aynu eegno dhawr dhacdo oo si weyn loo faafiyey oo ku saabsan faafreeb cabsigelin ah sannadihii u dambeeyey, kuwaas oo ka madhan eex qowmiyadeed.

